Brottsoffermyndigheten

Somaliska



# Ku saabsan dembiyada nacaybka



Buugyarahan waxaa loogu talagalay adigaaga la kulmay ama halis ugu jira dembiyo ku salaysan nacayb. Halkan waxaad ka baran doontaa waxa ay yihiin dembiyada nacaybku, xuquuqda aad leedahay adigaaga lagu xadgudbay iyo sida booliiska loogu gudbinyo ashkatada iyo weliba taageerada ilaalinta iyo caawimadada ay bulshadu ku siin karto.

# Ma laguu geystay dembi ku salaysan nacayb?

In lagugula kaco dembi waa xadgudub culus. Haddii dembiga laguugu geystay ahaanshahaaga dartii, xadgudubku waa uu ka sii culusyahay. Markaa waxay noqon kartaa in lagugula kacay dembi ku salaysan nacayb.

Iswiidhan dhexdeeda, waxaa dembi nacayb ku salaysan lagu tiriyaa takoorka sharci-darrada ah iyo in dad gaar ah colaad lagu kiciyo. Laakiin dembi kastaa wuxu noqon karaa mid nacayb ku salaysan haddii sababtu tahay in lagu xadgudbo haybta dhibbanaha. Wuxuu ku salaysnaan karaa

- Midab
- Qaranka ama isirka
- Diinta
- Qaabgalmoodka
- Jinsiga qofka
- Aqoonsiga jinsiga ama cabbiriddiisa
- Xaalad kale oo kuwaa shabbahda.

Uma baahnid in aad qolayahaas ku jirto si dembiga aad la kulantay u noqdo dembi ku salaysan nacayb. Waxaa ku filan in qofka dembiilaha ahi moodayo in aad kuwaas tahay ama uu kula xiriiriyo arrimo ku saabsan koox dhibbane ah. Dembiyada nacaybka waxaa lagula kaci karaa qof caadi ah laakiin sidoo kale waxaa la kulmi kara suxufiyiinta, cilmibaadheyaasha iyo siyaasiyiinta ku foogan doodaha bulshada. Dembiyada ku salaysan nacaybka waxaa lagula kici karaa xitaa dhismeyaal iyo goobo lagu xasuusto diimo ama dhaqan sida sinagoog, masaajid iyo xarun urur.

## Dembiga ku salaysan nacaybka, wuxuu yeelan karaa ciqaab qallafsan

Qofka gala dembi nacayb, waxaa maxkamaddu ku xukumi kartaaa ciqaab adag. Tusaale ahaan hanjabaadda iyo jirdilku waxay keeni karaan ciqaab adag haddii loo arko in ay dembi nacayb ku salaysnaayeen.

# Goobahee ayey dembiyadu ka dhacaan?

Dembiyada nacaybku way ka dhici karaan meel kasta. Waxay ka dhici karaan guriga, iskuulka, goobta shaqada, internetka ama meel kale. Waxay ka midaysanyihiin dembiyada nacaybku in ay badiyaaba ku salaysan yihiin aragti ah in dadka qaar ka sarreeyaan kuwa kale. Balse dembiyada ku salaysan nacaybka yahuuddu, wuxuu ka dhalan karaa aragti ku saabsan in yahuuddu yihini koox sarrayysa oo saamayn weyn iyo awood ku leh bulshada.

Dembigu wuxuu yeelan karaa wejiyo kala duwan. Tusaale ahaan dembiga nacaybka ee ka dhanka ah qoomiyadda Soomerka wuxuu u dhici karaa qaab gacankahadal iyo dhibaatayn ah oo lagula kaco dhaqashada REEN-ka.

Afrikaanka reer Iswiidhan, roomarka iyo dadka hbtqi-ga ah waxaa gacankahadal iyo kadeed loogu geeysan karaa iyaga oo bannaanka iska maraya uun. Dembiyada nacaybka ee xagga diinta waxay tusaale ahaan noqon karaan in xijaabka laga tuuro ama in internetka lagu faafiyo aragtiyo shirqool oo ku salaysan nacaybka yahuudda.

Caadi ahaan waxaa la moodaa in dembiyada nacaybku yihiin dhacdooyin waaweyn oo gacankahadal oo gaar gaar ah laakiin inay sidaan noqdaan qasab ma aha. Dembiga nacaybku wuxuu xitaa noqon karaa hanjabaad ama faallo xadgudub ah, waana kuwa aadka u badan. Waxa kale oo uu noqon karaa in hal qof lagula kacay takoorid markuu la xiriiray shirkad ama xafiis dawladeed.



# Dembi ku salaysan nacayb mise takoor?

Hadalka caadiga ah, ereyga takoorid waxaa badanaa loo isticmaalaa nooc ka mid ah cadaalad-darrooyinka kala duwan oo qofka loola dhaqmo. Laakiin si arrintu u noqoto takoorid sharciga khilaafsan, waa in ay xiriir la leedahay arrimaha  lagu saleeyo takooridda. Marka sharciga laga hadlayo, takooriddu waxay noqon kartaa takoorid sharcidarro ah ama takoorid ah sida sharciga takoorku dhigayo.

Takoorid sharcidarro ah, waa dembi nacayb ku salaysan oo ku qoran cutubka dembiyada ee sharciga. Waxaa dhici karta in lagugula kacay dembi nacayb, tusaale ahaan, haddii lagaa diido in aad wax iibsato ama aad gasho meel ama adeeg isla si la mid ah dadka kale. Markaa ganacsatadaha iyo qofka maamulaya isu imaadka guud oo keli ah ayaa lagu xukmi karaa takooridda sharcidarrada ah. Si qof loo xukumo, waa in la caddeeyaa i nay ujeeddadoodu ahayd inay takoorid sameeyaan, waana in aanu wax shaki ahi ku jirin in lagu takooray.

Sharicga tagooriddu wuxuu mamnoocayaa in la isku takooro shaqada, waxbarashada iyo meelo badan oo bulshada kale ah. Waxa kale oo uu ku saabsanyahay takooridda ku salaysan da'da iyo naafanimada, shardiguna ma aha in qofkan ku takoorayaa u badheedhay: Sidaa darteed waxaad heli kartaa magdhaw xitaa haddii aanu qofku u badheedhin in uu ku takooro. Waxaa caadi ah oo badan in takoorka loo eego sharciga takoorka marka loo barbardhigo shuruucda qusaysa takooridda sharciga darrada ah.

Wax dheeraad ah ka sii akhri **do.se**

Haddii aad la kulanto takoor, waxaad la xiriir kartaa booliska ama Wakiilka dawladda ee Takoorka (Diskrimineringsombudsmannen). Waxa kale oo xitaa aad la xiriiri kartaa xafiiska ka hortagga takooriddda. Markaa waxaad heli caawimo iyo warbixin ku saabsan xuquuqdaada iyo waxa aad yeelayso.

# Cawaaqibta dembiyada nacayba

Dadka lagula kaco faldambiyeed waxay uga falceliyaan siyaabo kala duwan. Qaarkood waxay tusaale ahaan ku falceliyaan shoog, werwer iyo cabsi halka qaar kale aanay saamayn weyn ku yeelan. Wakhtiga fog waxay la kulmidda xadgudubyadu keeni karaan shaqo ka fadhiisi, qulub iyo tiiraanyo. Taasi waxay qusaysaa dhammaan noocyada dembiyada, waana muhiim in aad caawimo dalbato haddii  aad dareento caafimaad darro.

> **” Waxaan ka cabsanayaa in mar kale la igu xadgudbo. Hurdo xumo ayaa i haysa, waxaanan dareemayaa walbahaar, xitaa marka aan guriga joogo. ”**

In lagugula kaco dembi ku salaysan nacayb, wuxuu keeni karaa cawaaqibxumooyin kale. Qofka lagu xadgudbay wuxuu bilaabi karaa tusaale ahaan in uu qariyo diintiisa, in uu ka fogaado meelaha qaar ama uu faraha ka qaado ku foognaanta siyaasadda iyo arrimaha ururrada, si uu uga badbaado in mar kale lagu xadgudbo. In dembi nacayb ku salaysan lagula kulmo internetka waxay keeni kartaa in dadku bedddelaan sida ay fikirkooda u cabbirayaan amaba ay iska aamusaan. Dembigu wuxuu xitaa keeni karaa dareenka amnidarro oo ku kordha qofka lagu xadgudbay iyo dadka ku dhadhow.

Dembiga ku salaysan nacaybka wuxuu keeni karaa in duruufta nololeed ee dadku aad u xumaato. Dadka ka tirsan kooxaha dhibban, waxay dareemi karaa in fursad loo simanyahay aanay ku lahayn kaalmaha bulshada iyo siyaasadda. Ururrada diiniga ah iyo ururrada kale waxaa la soo dersi kara dhibaato dhaqaale oo ka dhalanaysa baahida dheeraadka ah ee loo qabo tallaabooyin nabadsugud ah.

## Taageero iyo caawin

Waxaa jira taageerooyin iyo caawimooyin kala duwan oo aad heli karto haddii aad la kulanto dembi. Marka aad gudbinayso ashkatada dembiga ayaad helaysaa warbixin ku saabsan meesha laga heli karo taageero iyo caawin.



Haddii aad iskuul dhigato waxaad la xiriiri kartaa caafimaadka iskuulka ama waxaad la hadli kartaa macallin. Haddii aad shaqayso waxaad la xiriiri kartaa shaqabixiyaha ama daryeelka caafimaadka shirkadda. Iskuullada iyo shaqabixiyuhu waxay mas'uul ka yihiin ka hortagga iyo maaraynta xadgudubyada iskuulka iyo goobta shaqada.

Xitaa waxaad caawimo ka heli kartaa ururrada aan macaashdoonka ahayn tusaale ahaan Brottsofferjouren Sverige Waxay taageero iyo warbixin siiyaan dhibbanayaasha, markhaatiyada iyo qaraabada. Waxaa ka mid ah dad tabarruc ku shaqeeya oo luqado badan ku hadla oo ku caawinaya xitaa haddii aanad ku hadlin Af Iswiidhish ama sabab kale darteed aad u rabtoin afkaaga hooyo lagugu caawiyo. Marka aad soo wacdo lambarka telefoonka ee 116 006, waxaad la hadlaysaa lataliye kuu gudbinaya heeganka dhibbanayaasha ee degmadaada, si ay taageeradu kuugu sii socoto. Waad heli kartaa caawimada xitaa haddii aanad booliska u gudbin ashkatada dembiga, waxaanad dooran kartaa in la qariyo aqoonsigaaga.

> **” Ma aha in laga cabsado in la dalbado caawimo. Waxaan aad la kulantahay waa wax culus, waxaanu keeni karaa saamayn. ”**

Haddii aad la kulantay xadgudub dembi oo aad u baahantahay daryeel caafimaad, la xiriir xaruntaada daryeelka caafimaadka ama qaabilaadda degdegga ah. Sidoo kale waxaad booqan kartaa bogga internetka ee 1177 Vårdguiden ama wac 1177 si aad u hesho talabixin iyo hagid. Waa caadi in aad raadsato daryeel caafimaad xitaa haddii wakhti dheeri ka soo wareegay markii ay wax kugu dhaceen.

Haddii aad ka yartahay 18 jir waxad caawimo ka heli kartaa qaabilaadda dhallinyarada ee degmadaada ama internetka. Degmooyinka qaarkood waxay leeyihiin xarunta lagu taageero dhibbanayaasha dembiyada ee da'da yar. Halkaa waxaad ka heli kartaa taageero wadahadal ah, talabixin iyo caawimo farsamo.

### Hay’adda Sooshalka

Hay’adda adeegga bulshada ee degmadaadu waxay taageero siisaa dadka la kulma xadgudub. Adigaaga la kulmay dembiga iyo qaraabadaaduba waad heli kartaan taageero. Taageerada Sooshalku bixiyaa, waxay noqon kartaa taageero wadahadal, taageero bulsho iyo caawimo farsamo.

### Kaasho dadka kugu hareeraysan

Dadka kugu hareeraysan, qaraabada iyo saaxiibbadu waxay kuu caawin karaan siyaabo badan. Wax kula adag, ayaa noqon karaa wax si fudud loo maareeyo haddii aad la hadasho qof aad ku kalsoontahay. Waxaad u baahan kartaa in aad dadka kugu hareeraysan u kaashato arrimo farsamo sida in aad la xiriirto hay’adaha dawladda, haddii ay kugu adagtahay.

# In aad booliska u gudbiso ashkato

Haddii lagugula kaco dembi ama aad dareemayso in aad u baahantahay ilaalin, waxaad la xiriiri kartaa booliska. Waad gudbin kartaa ashkatada adiga oo wacaya 114 14 ama waxaad booqanaysaa isteyshin boolis. Haddii xaaladdu degdeg tahay, waxaad mar walba wacdaa 112.

Marka aad samaynayso ashkato boolis, waxaa muhiim ah in aad sheegto waxa ugu badan ee suurtagalka ah. Haddii baaritaanka hore lagu ogaado in dembigu nacayb ku salaysanyahay, wuxuu boolisku u gudbin karaa xeer ilaaliyaha caddayn wanaagsan. Taasi waxay keeni kartaa ciqaab adag oo maxkamaddu xukunto. Marka aad samaynayso ashkatada booliska, uma baahnid in aad ogtahay in waxan dhacay yahay dembi ku salaysan nacayb laakiin way fiicantahay in aad sheegto haddii aad sidaa u malaynayso. Dabadeedna, booliska iyo hay’adaha garsoorka ayaa go’aaminaya in ay tahay dembi ku salaysan nacayb iyo in kale.

> **” Haddii aan runta sheego, waan walaacsanaa markii hore. Laakiin qaabilaaddii boosku aad bay u wanaagsanayd, si dhab ah ayey wax iiga dhegaysteen. ”**

**Way fiicantahay in uu boolisku ogaado:**

- Ereyada cayda ah ee la yidhi markii wax dhacayeen.
- Derbi ku feegaar, qalab iyo astaamo xambaarsan farriimo nacayb oo ku saabsan qolo gaar ah.
- Dadka la tuhunsanyahay sidii ay hore ugu dhaqmen, tusaale ahaan haddii ay hadallo xadgudub ah ka yidhaahdeen qolo gaar ah.
- Dhacdooyin kale oo dhawaan dhacay ama meel dhow ka dhacay oo xambaarsanaa astaamo nacayb iyo tagoor ah.
- Haddii dembigu ka dhacay internetka waxaa habboon in aad sawir ka qaaddo si aad u haysato sawirro, faallo ama qoraal la soo dhigay.

## Shaqada booliisku uu ka qabto dembiyada nacaybka

Booliisku wuxuu sida ugu dhakhsaha badan isugu dayayaa in uu ogaado in dembigu lahaa sabab nacayb. Marka aad ashktadada dembiga gudbinaysaba, waxaa lagu weydiin karaa in aad u malaynayso in uu dembiiluhu u sameeyey dembiga sabab gaar ah. Sabab kale oo booliisku kuu weydiinayo waxa keenay dembiga nacaybka, waa in ay ka caawiso sawir guud oo ku saabsan heerka dembiyada nacaybka. Booliiska waxaa ka mid ah baareyaal iyo khubaro ku takhasusay dembiyada nacaybka.

**Xusuusnow:** Mararka qaar baaritaanka booliisku ma keeno in qof lagu soo oogo dacwad oo maxkamad lagu xukumo. Taasa micnaheedu waa in aan lahayn caddayn ku filan in la sii wado dembibaadhista si loo caddeeyo qofka dembiilaha ah. Taas macneheedu ma aha in booliiska ama xeer-ilaaliyuhu aysan rumaysnayn waxa aad u sheegtay. Ashkato u gudbintaada boolisku waa muhiim oo waxay ka caawinaysaa muujinta heerka dembiyada.

## Waxaad xaq u yeelan kartaa magdhaw

Haddii lagugula kacay dembi ku salaysan nacayb, waxaad xaq u yeelan kartaa magdhawga waxyeelladii uu dembigu geystay. Haddii uu dembigu ahaa mid nacayb ku saleysan, waxaad xaq u yeelan kartaa magdhaw badan.

**Noocyada kala duwan ee magdhawga**



Waxaad fursad u yeelan kartaa

- Magdhaw aad ka hesho dembiilaha
- Magdhaw caymis oo aad ka heshid shirkad caymis
- Magdhawga waxyeellada dembiyada oo aad ka hesho hay'adda dawladeed ee Brottsoffermyndigheten.

Ugu horrayn, waa qofka dembiga geystay ka bixinaya magdhawgga waxyeellada uu dembigu keenay. Hadii aad rabto in aad dalbato magdhaw, waxaad u sheegaysaa booliiska markaad ka warramayso dhacdada. Haddii ay maxkamaddu go'aamiso in aad xaq u leedahay magdhaw, waa in qofkii dembiga geystay uu ku siiyo. Hay'adda qaandhawga ee Kronofogden ayaa haddii loo baahdo kaa caawin karta in lacagta lagu siiyo.

Waxaad xaq u yeelan kartaa magdhawga caymiska iyo magdhawga waxyeellada dembiga  xitaa haddii qofka dembiga geystay aan lagu xukumin dembiga ama haddii aanu bixin karin  magdhawga. La xiriir caymiskaaga iyo hay'adda dawladeed ee qaabilsan dhibbanayaasha dembiga (Brottsoffermyndigheten) si aad u ogaato wixii quseeya kiiskaaga.

## Waxaad xaq u leedahay ilaalin

Haddii aad la kulantay hanjabaad ama si kale laguugula kacay dembi kale waxaad xaq u yeelan kartaa in lagu ilaaliyo. Sidaa darteed waa muhiim in aad booliska u sheegto wixii dhacay, gaar ahaan haddii aad dareemayso nabadgelyo la'aan ama aad ka baqanayso in  mar labaad lagugu xadgudbo. Qofka lagu xadgudbay ama halis ugu jira in lagu xadgudbo, wuxuu mararka qaar xaq u yeelan karaa in aqoonsigiisa la qariyo. Waxaa jira saddex nooc oo ilaalinta xogta aqoonsiga ah:

- Calaamadin sir ah
- Qarinta ciwaanka diiwaangelinta
- Aqoonsi shakhsiyeed maldahan.

Calaamadda sirta ah iyo qarinta ciwaaanka diiwaangelinta waxaad ka codsanaysaa wakaaladda cashuuraha ee Skatteverket. Badiyaa waxay Skatteverket dalbataa caddayn ka timid booliska ama sooshalka. Aqoonsiga maldahan waxaad ka dalban kartaa booliska. Mar kasta waxaa la sameeyaa qiimayn shakhsi-shakhsi ah oo lagu qiimaynayo in ilaalinta xogta aqoonsiga shakhsigu wax tarayso.

# Xasuusnow

Dembiyada ku salaysan nacaybka, ma aha uun weerar lagu qaaday qofka dembigan gaarka ah lagu sameeyey. Xitaa waxay baaq u diraysaa dhammaan qolada uu ka tirsanyahay qofkan lagu xadgudbay, waana weerar lagu qaaday bulshadeenna xorta ah ee furfuran.

**” In la igu naco ahaanshagayga, waxay leedahay damqasho aan la arkayn. ”**



Warbixin dheeraad ah waxaad ka helaysaa bogga hay'adda dhibbaneyaasha ee ah **brottsoffermyndigheten.se**.

Warbixinta ku qoran buugyarahan waxa sidoo kale loo turjumay:

- Af Carabi
- Af Daari
- Ingiriisi
- Afka Finland
- Jiddish
- Nordsamiska
- Kurmaanji
- Lulesamiska
- Meänkieli
- Af Eeraani
- Romani chib/arli
- Af Turki
- Afsoomaali
- Soraani
- Sydsamiska
- Tigrinja

Qaabayntii: Matador Kommunikation Naqshadaha: Jenny Almén

Brottsoffermyndigheten

Box 470, 901 09 Umeå
Telefon: 090-70 82 00
registrator@brottsoffermyndigheten.se
www.brottsoffermyndigheten.se